**Sharciga lamba. 46 ee 10 Janaayo 1971.**

**Ku kordhinta Xeerka 21 Janaayo 1979, lamba. 7.**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE KACAANKA**

Marka uu helay Oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka;

**WUXUU MEELMARIYAY**

Xeerka soo socda:

**Qod. 1.**

Faqradda labaad ee qod. 2 ee Xeerka 21 Janaayo 1970, lamba. 7 waxaa lagu kordhiyay baaraagrafka soo socda:

Haddii ay jiraan wax ka reebaya Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Maxkamadda waxaa gudoominaya La-taliyaha ugu xil-waalyeelsan, oo ay caawinayaan laba La-taliye.

**Qod. 2.**

Xeerkaan si deg-degga ayuu u dhaqangalayaa waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 10 Juun 1971.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
**S. Gaas Maxamed Siyaad Barre**